

Waayo-aragtida Dib-u-dejinta

Abdullah:

Rajada nolosha ee UK

Kahor inta aanu Abdullah ogaanin in isaga iyo qoyskiisa dib-u-dajin loogu sameyn doono UK bilowga sanadka 2018, aqoonta uu u laha dhaqanka iyo taariikhda dalka way koobnayd. Waxa uu ogaa in UK ay ka kooban tahay wadamo kala duwan, dadku aad ayay u daneeyaan shaaha, lahjadoodana ku kala duwan yihiin, boqoraddooduna waxay soo xidhata dhar aad u midab furan.

Markii uu maqlay in isaga, xaaskiisa iyo ilmahiisa la dajin doono Oxford, aad buu u farxay, sababtuna ma aha oo kaliya in walaashii dhawaan halkaasi la dajiyay, laakiin wuxuu yaaqaanay jaamacadda caanka ah wuxuuna u maleeyay in qof kasta oo halkaas jooga inuu ku hadlo lahjad sax ah oo si fudud fahami karo.

Suggidda Dhoofka

Sida la mid ah dhammaan qaxootiga loo tixgeliyey dib-u-dejin, Abdullah ma awoodin inuu doorto waddanka uu dib-u-dejin lahaa. Dalka Urdun, oo qoyskiisu magangelyo waydisteen, wuxuu ku noolaa maalin-maalin, wuxuuna la kulmay takoor uga yimid bulshada deegaanka. Waxa uu u arkay dib u dejinta fursad uu ku bilaabo nolol cusub isaga iyo qoyskiisa. Markii UNHCR ay u yeertay si ay ugu sheegto in loo tixgalin doono dib u dejinta UK, aad ayuu u farxay.

Lixdii bilood ee u dhaxaaysay waraysiga UNHCR u la yeeshay iyo imaatinka UK, Abdullah iyo xaaskiisa waxa ay IOM ka soo qayb galeen fasalo hanuunin dhaqameed ah si ay wax badan uga ogaadaan waxa laga filayo nolosha UK. Casharradii waxa ay socdeen laba maalmood oo keliya waxana uu xasuustaa in loo sheegay in uu muddo shan sano ah baran karo Ingiriisiga, dawladduna ay si fiican u daryeeli doonto muddadaas. Dhab ahaantii, macalinku wuxuu qoysaska kula taliyay in aysan si degdeg ah u baran af Ingiriisiga haddii kale lagu riixi doono inay shaqeeyaan oo ay waayaan taakuleenta dawladda. Hadal maleh, marki uu yimid, waxay ahayd wax xoogaa la-layaab leh in u ogaado in sidaas aanay ahayn xaaladdu.

Maalin maalmaha ka mid ah, qof ayaa wacay Abdullah si uu ugu sheego in qoyskiisa ay dajin doona Kooxda Kafaala-Qaadatada Bulshada ee Oxford. Waxaa loo sheegay in Kooxdoo ay wax walba u qaban doonta qoyskiisa. Maaddaama walaashii ay horey ugu nooleyd Oxford, iyada ayay sii mareen xubnaha kooxdoo sii ay la xidhiidhaan Abdullah .** Waxay gurigiisa katuseen Khariidadaha Google

waxayna u sheegeen taageerada ay u fidin doonaan. In u ogaado cidda madaarka diyaaradda ku soo dhawaynaysa isaga iyo qoyskiisa ayaa ka dhigtay u safrida UK noqdo mid xiiso halku walaac badnaan lahaa.

Nolosha iyo dhaqanka UK

Abdullah waxa uu wax ka baranayay jaamacad ku taal Xalab ka hor intii aanu ka soo cararin Suuriya, taas oo uu aaminsan yahay in ay u fududasay in uu xooga saaro waxbarashada iyo barashada luuqada Ingiriiska isla markii uu soo gaadhay UK. In kasta oo inta aanu iman ka hor af Ingiriisigu ku koobnaa “hello, sidee tahay”, haddana wuu dadaalay oo si degdeg ah ayuu u bartay. Xataa waxa uu mutadawacnimo ka bilaabay madxaf maxalli ah ka dib dhawr bilood oo uu joogay Oxford taas oo keentay in uu jago lacag ah qaato sannadkiisii ugu horeeyay ee UK.

Oxford, waxaa ay leedahay bulsho weyn oo Suuriyaan ah iyo Bariga Dhexe oo fududaysay in qoyska Abdullah ay awoodaan inay helaan dhammaan cuntooyinka ay jecel yihiin iyo oo ay ula dabaaldegaan ciidaha muhiimka ah dadka ka socda bulshadooda. Waxa uu ku faraxsan yahay in isaga iyo qoyskiisu ay ilaashan karaan dhaqankooda iyada oo la qaabilayo bulshadooda, wuxuuna dareensan yahay in UK, dadku ay haystaan fursado ka wanaagsan sidii ay ku lahaayeen Suuriya. Waxa uu ku faanaa in uu yahay Suuriyan oo uu jecel yahay taariikhdeeda iyo cuntadeeda - waxa kaliya oo uu jecel lahaa in dadka Britishka ah ay wax badan ka ogaadaan dhaqanka qani ah ee Suuriya halkaa ay diiradda saari lahaayeen xaaladda hadda jirta.

. *(Xusuusin dib u dajin: Fasalada wacyigelinta dhaqameed ee IOM waxa ay soo mareen habsocod dib u eegis aadna way u soo hagaageen ilaa bilawgii 2018).

** Kooxaha kafaala-qaadka bulshada aad ayay u yartahay inay la xiriiraan qoyska ay taageeraan ka hor intaysan iman UK. Xaaladdan oo kale, xo xiriirka Abdullah walaashii ayaa lagu qoray UNHCR RRF kooxduna way awooday inay la xiriirto